



# Waa maxay barnaamijkha Isku-diyaarinta Ardeyga ee Dhigashada Kulleejka?

**Ardyada dugsiga sare:** Barnaamijkha Isku-diyaarinta Ardeyga ee Dhigashada Kulleejka (College Bound) waa ballanqaad hore oo ah kaalmada dhaqaale ee gobolka, sida Deeqda Waxbarashada Kulleejka ee Washington (Washington College Grant), si ay kaaga caawiso bixinta kharashka waxbarashadaada ka dib dugsiga sare. Qadarka lacagta ay ardaydu u-qalmaan waxay ku salaysan tahay kharashka dhexdexaadka ah ee waxbarashada (heerka kuleejyada dawlada), kharashyada qaar, iyo xaddi yar oo loogu talagalay in lagu iibsado buugaagta. Waa aad u isticmaali kartaa lacagaha barnaamijkha Isku-diyaarinta Ardeyga ee Dhigashada Kulleejka si ay kaaga caawiso bixinta kharashka waxbarashadaada in ka badan 60 kuleejyada, jaamacadaha, iyo dugsiyada farsamada ku yaal Washigton qaybtana ka ah barnaamijkan.

## Sida loo sii ahaado mid u sii qalma

### Shuruudaha barnaamijka:

- Ka qalin jebiso dugsiga sare oo ku yaalo WA, dugsi guriga wax lagu barto, ama ka hel GED (General Educational Development, Shahaadada Heer Tacliineedka Guud) gudaha WA.
- Hano ugu yaraan GPA (Grade Point Average, Celceliska Dhibcaha Waxbarasho) 2.0 haddii aad si toos ah uga soo gudbeysyo dugsiga sare kuna biirayso kulleej afar sano la dhigto.
  - » Ma jirto wax shuruud GPA ah haddii aad u gudbeysyo kulleej bulsheed ama mid farsamo.
- Waa inaadan gelin wax danbi ah.
- Isdiiwaangeli kulleej ama dugsi xirfaddeed kasta gudaha hal sano kadib qalinjebinta dugsiga sare si aad u buuxiso wakhtiga kama dambaysta ah ee isdiiwaangelinta.

## 2025-26 dakhliga qoyska dhexe

| Tirada Qoyska | Dakhliga Sanadlaha ah* |
|---------------|------------------------|
| 1             | \$44,500               |
| 2             | \$58,000               |
| 3             | \$71,500               |
| 4             | \$85,500               |
| 5             | \$99,000               |
| 6             | \$112,500              |
| 7             | \$115,000              |
| 8             | \$117,500              |

\*Qoyska dakhligisu waa inuu ka yaraado ama u dhigmaa cadadkan.

## Sidee ayaan u heli doonaa lacagta barnaamijkha Isku-diyaarinta Ardeyga ee Dhigashada Kulleejka?

- Xareyo codsiga kaalmada maaliyadeed FAFSA (Free Application for Federal Student Aid, Codsiga Bilaashka ah ee Kaalmada Ardeyga ee Federaalka) ama WASFA (Washington Application for State Financial Aid, Codsiga Kaalmada Maaliyadeed ee Gobolka Washington) sanadkaaga ugu dambeeyaa ee dugsiga sare (iyo sannad kasta oo aad dhiganeysyo kulleejka).
- Buuxi shuruudaha dakhliga iyo deganaanshaha gobolka. Kulleejkaagu waxa uu eegi doonaa haddii aad buuxiso shuruudaha dakhliga ee ku qoran shaxda dakhliga MFI (Median Family Income, Dakhliga Qoyska Dhexe).
- Isdiiwaangeli kulleej ama dugsi xirfaddeed u qalma oo ku yaal gudaha WA (waxaa jira in ka badan 60!) **gudaha hal sano kadib qalinjebinta dugsiga sare**, isla markaana ku sii jir buuxinta shuruudaha.

Barnaamijkha Isku-diyaarinta Ardeyga ee Dhigashada Kulleejka waxaa la isticmaali karaa ilaa lix sano kadib markaad kulleej iska-diiwaangeliso ama ilaa aad ka hesho shahaadada jaamacadda ee koowaad, midba midka soo horeeya.

## Muxuu Barnaamijkha Isku-diyaarinta Ardeyga ee Dhigashada Kulleejka iiga baahan yahay?

- Xaqiji in Barnaamijkha Isku-diyaarinta Ardeyga ee Dhigashada Kulleejka uu hayo iimaylkaaga, lambarka taleefankaaga, iyo ciinwaankaada boostada ee hadda.
- La xiriir la-taliyaha dugsigaaga si aad u sii anba-qaado socdaalkaaga qalinjebinta.

Ka sahmi kulleejyada, jaamacadaha, iyo dugsiyada tegnalooyiyada ee u qalma adigoo booqanaya barta [wsac.wa.gov/sfa-institutions](http://wsac.wa.gov/sfa-institutions).

## Ma u baahan tahay caawimaad? Farriin u dir Otter!

OtterBot waa adeeg qoraal ah oo taageera dhammaan ardayda dugsiga sare iyo waalidiinta WA. Waxay wadaagtaa talooyin ku saabsan Barnaamijkha Isku-diyaarinta Ardeyga ee Dhigashada Kulleejka, qorshaynta kulleej dhigashada, iyo kaalmada maaliyadeed. Isdiiwaangeli adigoo isticmaalaya koodhka QR:

Ardyada



Waalidiinta/mas'uuliyiinta



Barnaamijkha Isku-diyaarinta Ardeyga ee Dhigashada Kulleejka waa barnaamij ay maamulaan Golaha Guul-gaaritaanka Ardayda ee Washington (Washington Student Achievement Council).



Miyaad u baahan tahay caawinaad ama ma qabtaa wax su'aalo ah?  
Nagala soo xiriir:  
[collegebound.wa.gov](http://collegebound.wa.gov)  
[collegebound@wsac.wa.gov](mailto:collegebound@wsac.wa.gov)  
888.535.0747 (doorashada 1)